


SIDA AAD ADIGA LAFTIGAAGA U SAMEYSAN KARTO BAARITAANKA LAGU SAMEEYO AFKA ILMAGALEENKA (CERVICAL SCREENING)




NATIONAL
CERVICAL SCREENING
PROGRAM
A joint Australian, State and Territory Government Program




TALLAABADA KOOWAAD

- Hoos u dhig kastuumahaaga/nigiskaaga
- Wareeji furka suufka wax lagu baaro ka bacdina ka soo saar caaga
- Fiiri suufka oo la soco calaamadda cas ee ugu dhow caarrada jilicsan




TALLAABADA LABAAD

- Meel iyo qaab aad si dhib la'aan ah baaritaanka ugu sameyn karto hel. Waad istaagi kartaa, fadhiisan kartaa ama jiifsan kartaa
- Geli suufka siilkaaga, adoo isku dayaya inaad geliso ilaa calaamadda guduudan ee yar (tani waxay la mid tahay dhererka farta suulka ku xigta)



TALLAABADA SADDEXAAD

- Si tartiib ah ugu wareeji suufka ugu yaraan 10 ilbiriqsi
- Ka dibna ka saar suufka
- Xanuun ma dareemi doontid



TALLAABADA AFARAAD

- Ku celi suufka wax lagu baaro caagiisa
- Ku soo celi qalabka wax lagu baaro adeeg-bixiyahaaga daryeelka caafimaadka



Adeeg-bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa ku siin doona suufka. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, weydii adeeg-bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

